

Ogeysiiska Ka-Bixidda ee Waalidka iyo Ardeyda Minnesota

Fadlan ogow, sida uu dhigayo sharciga Minn. Stat. § 120B.20, in aan ilmahayga u rabo in la iiga saaro sannad-dugsiyeedka hadda socda xiisadaha ama waxbarashada, barnaamijyada, iyo/ama casharrada fasalka ee aanan u rabin. Ka-saaristan waxay khuseysaa santuuqyada aan calaamadiyey ee hoose oo dhan:

Waxbarashada Galmada iyo aaydhiska ama HIV/AIDS – Marka loo tixraaco sharciga Minn. Stat. § 120B.20, waraaqdan waa ogeysiis in ilmahayga la iiga saaro xiisadaha ka hadlaya galmada iyo waxbarista la xiriirta HIV/AIDS.

Macluumaadka Shakhsi Ahaaneed – Iyada oo loo tixraacayo sharciga 20 USC § 1232(h), wixii maqnaansho ah oo uu sabab u yahay oggolaanshahaygan qoran, marna ma dhici karto in mid ka mid ah waxyaabaha soo socda la weydiyo ilmahayga. Sameynta wax aanan rabin oo la xiriira fikrado aanan rabin oo la uruurinayo, falanqeyn ama qiimeyn kasta oo muujin karta: (1) xiriir siyaasadeed ama caqiidada ilmahayga ama aniga, (2) dhibaato maskaxeed ama mid cilminafsi-ahaan ula xiriirta ilmahayga ama qoyskeyga, (3) habdhaqanka wax kasta oo la xiriira galmada, (4) wax aan ahayn sharci, bulsho-diidid, is-edayn shakhsiyeed, ama dhaqan ah is-liidid, (5) qiimeyn muhiim u ah dad kale oo ay kuwa loo jawaabay la leeyihiin xiriir qoys ahaaneed oo dhow, (6) sifo sharci ah oo loo aqoonsan yahay mudnaan ama xiriir gaar ah ah in wax kale loola barbardhigo, sida xiriirka qareenka, dhakhtarka caafimaadka, iyo culumada diinta, (7) dhaqan ama xiriir ah mid diineed, ama caqiidada ilmahayga ama aniga, ama (8) dakhligeyga (marka laga reebo in sharci ahaan loogu baahan yahay oo lagu go'aaminayo xaqu-yeelashada barnaamij ama helitaanka kaalmo dhaqaale oo ah wax la xiriira barnaamij).

Tallaalka – Sida uu dhigayo sharciga Minn. Stat. § 121A.15, fadlan ogsoonow in aan adeegsanayo xuquuqda aan u leeyahay ka-dhaafidda tallaalka marka la isu eegayo diin la rumeysan yahay awgeed. Waraaqda lifaaqa ah waa waraaq xaqiijisan ama aan soo mariyey shaabbad nootaayo oo ah diidmada tallaalka marka lagu saleynayo damiir iyo caqiido awgeed. (*Ugu lifaaq waraaqda nootaayada soo martay ee ay waalidku saxiixeen ee foomkan*)

Waa in iskuulku haysto ogeysiiskan oo saxiixan, oo la geliyo feylka ama galka ilmahayga. Ogeysiiskan waxa uu gelayaa booska ogeysiisyada kale ee ah Ka-Bixidda oo dhan.

Magaca ilmaha _____ Fasalkuu Dhigto ____ Taariikhda _____

Magaca(yada) Waalidka/Masuulka _____

Saxiixa Waalidka/Masuulka _____

Cinwaanka Waalidka/Masuulka _____

Lambarrada Taleefanka Fiidkii/Maalintii _____

Magaca Iskuulka _____ Degmada Iskuulka _____

Waxaa Loo Dhiibay (Magaca Qofka Far Waaweyn) _____

Qofka Loo Dhiibay (Saxiixa) _____ Taariikhda Loo Dhiibay _____

Tilmaamaha iyo Macluumaadka Isticmaalidda Ogeysiiska Ka-Bixidda ee Waalidka iyo Ardeyda Minnesota

Waxaad Sameyneyso

OGEYSIISKA KA-BIXIDDA WAA IN SANNAD KASTA ISKUULKA LA GEEYO

Ogsoonow: Habraacyadan waxaa loogu talagalay in ay waalidka ku caawiyaan buuxinta ogeysiiskan. Habraacyada ku qoran waraaqdan waa in aan loo geyn iskuulka.

- 1) Koobbi ka sameyso oo waalidiinta kale la wadaag Ogeysiiska Ka-bixidda ee Waalidka iyo Ardeyda Minnesota.
- 2) Ogeysiiskan waxaad calaamadin kartaa santuuq kasta oo khuseeya wixii aad ka welweleyso. Waxaad calaamadin kartaa arrin kasta, hal arrin oo keliya, ama dhowr arrimood, balse waxay ku xiran tahay waxaad adigu aaminsan tahay.
- 3) Laba koobbi ka sameyso ogeysiiskan markaad buuxiso. Ka dibna, qalin ku saxiix oo koobbi kasta taariikhda ku qor.
- 4) Waraaqdan Ogeysiiska Ka-bixidda ah adigoo ka dhigaya gacan-ka-dhiib ugu dir Maamulaha cinwaanka iskuulka, boostada internetka (email), fakis, ama hab kasta oo kale oo aad ugu geyn karto oo aad hubto. Uma baahnid oo kama codsanaysid "heshiis" ama "oggolaansho." Waxa keliya oo aad u baahan tahay waa caddeyn ah in aad iskuulka u gudbisay Ogeysiiska Ka-bixidda.
- 5) Koobbi ka reebo adigu qoys ahaan (caddeynta boostada) oo u sheeg in iskuulku koobbi geliyo feylka ilmahaaga (ama galka xogta ardeyda). Koobbi aad saxiixday adigu naftaada u hayso.
- 6) U sheeg ilmahaaga in ay kuu soo sheegaan marka lagu khasbo in ay galaan xiisadaha ama waxyaabaha aad adigu iskuulka ka codsatay in ay ilmahaaga kaaga reebaan.
- 7) Koobbi ah Ogeysiiska Ka-bixidda u gudbi iskuulka ilmaha mar kasta oo aad ilmahaaga ku qoreyso sannad-dugsiyeed cusub.